# Naftaada ka ilaali kansarka – Qaado tallaalka HPV!

Haddii aad ka yar tahay 27 sano, waxaa lagugula talinayaa inaad qaadato tallaalka HPV. Tani waxay khusaysaa haddii aadan hore u qaadan tallaalka HPV. Tallaalku waa bilaash waana mid ikhtiyaari ah.

**Waa maxay HPV?**
HPV waa fayras si aad ah u faafa oo sababi kara noocyo kala duwan oo kansar ah. Markaad qaadato tallaalka HPV, khatarta aad ugu jirto inaad qaaddo kansar way yaraataa.

**Sida loo qaato tallaalka**
Balan ka qabso xarunta caafimaadka Kaliya qaar ka mid ah xarumaha caafimaadka ee degmo kasta ayaa bixiya tallaalka.

Ballan ka samee bogga internetka ee mittvaccin.se.
Waxa kale oo aad sawiri kartaa khoodka QR-ka.

Ma dugsi sare ayaad dhigataa? Dugsiyada sare qaarkood waxay tallaalka ku bixiyaan gudaha dugsiga. La xiriir adeegga caafimaadka ardayda

**Laba qiyaas oo tallaal ah ayaa bixiya difaac wanaagsan.**
Si aad u hesho difaac wanaagsan oo ka dhan ah HPV, waxaad u baahan tahay laba qiyaas oo tallaalka ah. Waa inaad qaadataa qiyaasta labaad 6 ilaa 12 bilood ka dib qiyaasta koowaad. Kala-fogaanshaha 12 bilood ah ee u dhexeeya labada qiyaas wuxuu bixiyaa difaac ka wanaagsan. Sidoo kale waxaa bilaash ah qiyaasra labaad.

Tallaalka HPV waxaa la siinayay dhammaan ardayda fasalka 5-aad tan iyo 2020.

**Ka akhri wax badan oo ku saabsan tallaalka HPV**
Booqo 1177.se ama sawir koodhka QR.
1177.se/sormland/hpv-vaccination

1177 | Region Sörmland